

<https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt/retroactive-p-ebt-faq.html>

Su'aalaha Badanaaba La Isweydiyo ee Dib-u-celinta P-EBT ga

### **Waa maxay Manfacyada P-EBT ee dib-u-celinta?**

Manfacyada P-EBT ee dib-u-celinta ah waxay xalliyaan wax kasta oo manfac ah oo aan lagu siinlaga bilaabo Sannad Dugsiyeedka (School Year) (SY) 2020/2021.

### **Ayaa xaq u leh Manfacyada Dib-u-celinta?**

Ilmo kasta oo u qalma Wareega 2-aad ama Wareega 3 Manfacyada P-EBT laakiin aan weli helin lacagta oo buuxa waxay xaq u yeelan doonaan inay helaan Manfacyada Dib-u-celinta. Fadlan tixraac shuruudaha u-qalmitaanka ee ku qoran [www.tn.gov/humanservices/p-ebt](http://www.tn.gov/humanservices/p-ebt).

### **Yaa go'aaminaya haddii canuga/ardayga uu u qalmo barnaamijka Manfacyada P-EBT ee dib-u-celinta?**

Dugsi kasta/degmo dugsiyeed kasta ee bixiyay Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee ee bixiyay macluumaadka ardayda u qalma inay helaan manfacaha P-EBT ga. Haddii aadan hubin in ilmahaagu u qalmo Manfacyada Dib-u-celinta ee ku saleysan shuruudaha sare, fadlan kala xiriiir khadka caawinta P-EBT oo ah (833) 496-0661.

### **Sidee iyo goorma ayaan heli doonaa Manfacyada Dib-u-celinta?**

Dhammaan lacagaha dib-u-celinta oo dhan waxaa lagu soo shubi doonaa kaarka P-EBT ga ee Wareegga 3 hadda bishan Maarso 2022. dhexdeeda. Haddii kaarkaaga aad iska tuurtay oo hadda aad u baahan tahay inaad mid cusub codsato, fadlan booqo [www.connectebt.com](http://www.connectebt.com) Si aad u codsato kaarka P-EBT ga cusub ama soo wac 1 (888) 997-9444. Sidoo kale waxaad soo wici kartaa khadka Caawinaada ee P-EBT ga adigoo soo waca lambarka (833) 496-0661.

### **Muxuu ardaygaygu uu u heli waayay Manfacyada Dib-u-celinta?**

Haddii ay kula tahay in ardaygaagu u qalmo laakiin aadan helin lacagta aan kaarkaaga lagu soo shubin, soo wac khadka caawimaadda P-EBT ga lambarka waa (833) 496-0661. Shuruudaha u-qalmitaanka ayaa sidoo kale lagugu diyaariyay si aad u aragto [www.tn.gov/humanservices/p-ebt](http://www.tn.gov/humanservices/p-ebt).

### **Meeqaa ayaan helayaa?**

Qadarka manfacaha P-EBT ga waxay ka tarjumaysaa xaalada waxbarasho ee arday kasta marka loo eego diiwaanka imaanshaha dugsigooda. Qadarka lagu soo shubayo wuu kala duwanaan karaa ardayba ardayga kale, xataa qoyska dhexdiisa. Waaxda TDHS ayaa soo saari doontaa Manfacyada Dib-u-celinta ee bil kasta (bilaha) ardaygu u qalmo laakiin aan helin wax manfac ah inta lagu jiro nidaamka P-EBT Wareega 2aad ama Wareega 3aad.

Waxaad ka hubin kartaa kaarkaaga P-EBT ga inta ku jirta [www.connectebt.com](http://www.connectebt.com) ama adiga oo waca lambarka dhabarka kaarkaaga P-EBT ga ku qoran.

### **Anigu ku ma raacsani cadada Manfacyada Dib-u-celinta ee ilmahaagu ay heleen, maxaan samayn karaa?**

Qoysaska raba inay rafcaan/dacwad ka qaataan waxay gali karaan Barta Internetka ee Rafcaanka/Dacwad ka qaadashada oo ah: <https://appealonline.dhs.tn.gov/Home/Login> ama wac (833) 496-0661.

<https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt/retroactive-p-ebt-faq.html>

Su'aalaha Badanaaba La Isweydiyyo ee Dib-u-celinta P-EBT ga

**Waxaa la ii sheegay in ilmahaygu ayna u qalmin inuu helo ama ay hesho kaarka Manfacyada P-EBT ee dib-u-celinta, laakiin waxaan aaminsanahay inay u qalmaan. Maxaan sameyn karaa?**

Qoysaska raba inay rafcaan/dacwad ka qaataan waxay gali karaan Barta Internetka ee

Rafcaanka/Dacwad ka qaadashada oo ah: <https://appealsonline.dhs.tn.gov/Home/Login> ama wac (833) 496-0661.